

***** OGEEYSIISKA ISBEDDELLADA XAALADDA DEGDEGGAA EE HAWLFULINNADA
MAXKAMADAH*****

Ayadoo laga jawaabayo xaaladda degdeggaa ee caafimaadka dadweynaha ee faafidda fayraska cusub ee karoona/COVID-19 uu keenay, **Maxkamadda Degmo Deegaanka King (KCDC) waxay ku sameysay isbeddallo waaweyn hawlfulinnadii maxkamadda (fadlan si taxadar leh u akhri macluumaadka hoos ku-xusan).**

Laga bilaabo Maarso 23, 2020, illaa Maayo 4, 2020, ama illaa amar dambo oo maxkamadda, **Dhismayaasha Maxkamadaha KCDC ee Seattle, Maleng Regional Justice Center (Kent), iyo Bellevue** oo keliya ayaa u furnaan doona adeegyo xaddidan Isniin illaa Jamce laga bilaabo 8:30 a.m. illaa 11:00 a.m.

Dhammaan goobaha kale ee Maxkamadda Degmo Deegaanka King wey xiranyihiin illaa ogeeysiis dambe.

Haddii aad u baahantahay inaad codsatid **Amar Dhibaateyn-joojis ah ama Amar Dabagal dhibsasho-leh**, waxaad ka **codsan kartaa khadka**. Macluumaad dheeraada sida loo codsado, eeg hoos.

Khadka foonka ee Maxkamadda Degmo Deegaanka King (206) 205-9200 sidiisii buu u furanyahay Isniin illaa Jamce 8:30 a.m. illaa 4:30 p.m.

Fadlan ha imaan dhismaha Maxkamadda Degmo Deegaanka King haddii aad xanuunsantahay ama isku aragtid calaamadaha hargabka sida qufac, qandho ama xanuun kale oo hawomareeneed.

Macluumaad ku-saabsan mawduucyada soo socda, guji hoos.